ORD 25-31 – Xuquuqda, Waajibaadka, Khayraadka Kiraystayaasha

Waxay dhaqan-gashay 14-ka May, 2026

KU SAABSAN ORD 25-31

ORD 25-31 waxay dejinaysaa ilaalinno iyo xuquuqo cusub oo la cusboonaysiiyay oo loogu talagalay kiraystayaasha, waxayna bixisaa macluumaad muhiim ah oo ku saabsan xuquuqda, waajibaadka iyo khayraadka ay heli karaan kiraystayaasha, mulkiilayaasha guryaha, milkiilayaasha hantida iyo shirkadaha maareeya guryaha ee ku yaalla gudaha Magaalada Saint Paul

KIRAYSTAYAASHA

Xuquuqda kiraystayaasha

- In lagu siiyo shuruudaha iyo habraacyada baaritaanka codsadaha (screening criteria**)** ka hor inta aan la gudbin codsiga kirada
- In lagu siiyo wadarta kharashka kirada iyo khidmadaha ikhtiyaariga ah
- In lagu siiyo warbixinta baaritaanka codsadaha (screening report**)** marka la farsameeyo, oo ay ku jiraan magaca iyo macluumaadka xiriirka shirkadda samaysay baaritaanka
- In lagu siiyo warbixinta deynta (credit report) marka la farsameeyo
- In lagu siiyo ogeysiis 60 maalmood ah ka hor inta aan la bilaabin tallaabooyinka ka saarista ama guriga lagaga saarayo (eviction). Sharcigan ku-meel-gaarka ah wuxuu dhaqan-gal yahay ilaa **31-**ka Diseembar, 2026; laga bilaabo 1-da Janaayo, 2027, muddadu waxay dib ugu noqonaysaa 30 maalmood
- Inaad gudbiso cabasho adigoon la kulmin aargoosi ama tallaabo ciqaabeed

Waajibaadka Kiraystayaasha

- Inaad kirada ku bixiso waqtigeeda
- Inaad guriga ama qaybta aad kiraysatay ku ilaaliso xaalad ammaan ah oo nadiif ah
- Inaad si waqtigeeda ku habboon uga warbixiso dayactirka loo baahan yahay ama dhibaatooyinka ka jira guriga
- Inaad ka jawaabto ogeysiisyada iyo farriimaha laguu soo diro
- Inaad u oggolaato gelitaanka guriga ama hantida marka laguu soo diro ogeysiiska sharcigu waajibinayo

Khayraadka Ay Heli Karaan Kiraystayaasha

Caawimaadda Sharci iyo U-doodista

- HOMELine – https://homelinemn.org/ | 612-728-5767
- Southern Minnesota Regional Legal Services (SMRLS) – https://www.smrls.org | 651-222-5863
- Volunteer Lawyers Network (VLN) – https://www.vlnmn.org | 612-752-6677
- Housing Justice Center (HJC)– https://www.hjcmn.org/resources

Deganaansho Xasilloon iyo Taageero

- Adeegyada Xasilloonida Guryaha ee Degmada Ramsey – https://www.ramseycounty.us/residents/assistance-support/assistance/housing-services-support | 651-266-1050
- Mashruuca Xasillinta Bulshada – https://csp501dale.wixsite.com/communitystabproject | 651-225-8778

Dhexdhexaadin iyo Kaalmada Kirada

- Dhexdhexaadinta Bulshada ee Minnesota – https://communitymediationmn.org/ | 1-833-266-2663
- Xarunta Xallinta Khilaafaadka – https://www.disputeresolutioncenter.org/ | 651-292-7791

Kaalmada Degdegga ah iyo Khayraadka Dhaqaale

- Kaalmada Degdegga ah ee Kirada ee Saint Paul – https://www.stpaul.gov/departments/planning-and-economic-development/housing/emergency-rent-assistance
- Xarunta Khayraadka Dhaqaale ee Saint Paul – https://www.stpaul.gov/financialhub
- Kaalmada Degdegga ah ee Degmada Ramsey – https://www.ramseycountymn.gov/residents/assistance-support/assistance/financial-assistance/emergency-assistance
- Kaalmada Tamarta ee CAPRW – https://www.caprw.org/projects-energy

Takoorka iyo Xuquuqda Aadanaha

Xeerka Xuquuqda Aadanaha ee Saint Paul (Saint Paul Human Rights Ordinance) wuxuu mamnuucayaa takoorka dhinaca guryaha, iyadoo lagu salaynayo jinsiyadda, midabka, waddanka ama meesha uu qofku asal ahaan ka soo jeedo, naafonimada, jinsiga, jihada galmada, diinta, caqiidada, da'da, xaaladda guurka, xaaladda qoyska, abtirsiinta, iyo xaaladda la xiriirta helitaanka kaalmooyinka dadweynaha.

Qaybta Xuquuqda Aadanaha

- Telefoon: 651-266-8966
- Email: hrightscomplaints@ci.stpaul.mn.us

MULKIILAYAASHA GURYAHA, MILKIILAYAASHA HANTIDA IYO SHIRKADAHA MAAREEYA GURYAHA

Xuquuqda Mulkiilayaasha Guryaha

- Inay sameeyaan shuruudo baaritaan oo isku mid ah dhammaan codsadayaasha
- Inay codsadaan tixraacyo
- Inay dalbadaan kirada hal bil oo dheeraad ah, marka ay jiraan duruufo u qalma sida uu sharcigu dhigayo
- Inay dib u eegaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan kiraystaha si ay dib ugu qiimeeyaan go'aanka

Waajibaadka Mulkiilayaasha Guryaha

- Shuruudaha Ogeysiiska Iibka Hantida
- A Xaddidaadaha khuseeya baaritaanka codsiyada kiraystayaasha
- Xaddidaadaha ku saabsan deebaajiga Lambarka Sooshiyaal Sekuuritiga
- Bixinta ogeysiis 60 maalmood ah oo ku saabsan kirada aan la bixin ka hor inta aan la gudbin dacwadda ama tallaabada ka saarista kiraystaha (eviction) — shuruuddani waa ku-meel-gaar oo dhaqan-gal ah ilaa 31-ka Diseembar, 2026)
- U hoggaansamidda muddada ilaalinta kiraystaha iyo bixinta kaalmada dib-u-dejinta, sida uu dhigayo xeerku
- In la ogaado lana fahmo ka-reebista khuseysa iyo qodobbada la xiriira fulinta xeerka

Khayraadka Mulkiilayaasha Guryaha

- 4(d) Dhiirrigelinta Guryaha La Awoodi Karo ee Qodobka – https://www.stpaul.gov/departments/planning-and-economic-development/housing/housing-trust-fund/housing-trust-fund
- Ururka Guryaha Kirada Badan ee Minnesota – (952) 854-8500 | mha@mmha.com
- Buugga Hagaha Kiraystayaasha ee Xeer Ilaaliyaha Guud ee Minnesota – https://www.ag.state.mn.us/Consumer/Handbooks/LT/default.asp

Waxaa loo diyaariyey ujeeddooyin waxbarasho iyo wacyigelin bulsho.